

# Teetannada

## Waa maxay teetanadu?

Teetanadu waa cudur xanuun badan, oo badanaa loo dhinto. Bakteeriyada ku jirta ciida ama xaarka xoolaha ayaa siidaysa sun kadibna sababta murqo xanuun iyo jaqallo xiran. Ciladaha ayaa faafa ayagoo sababaaya murqo jawrar, dhibaatooyinka neefsiga iyo wadne garaac khaldan.

## Sidee ayuu cudurka teetanadu ugu dhacaa dadka?

Bakteeniyada ka timaada ciida ama saalada xoolaha ayaa jirka ka gasha meelaha furan ee dhaawaca ah iyo meelaha gubtay. Dhaawaca ayaa noqon kara mid yar ama wax yar oo jeexdin ah. Teetanadu ma faafto (iskagama faafto dadka dhexdooda). Dadka ayaa teetanada ka qaada dhulka kamana qaadaan dadka kale.

## Waa maxay astaamaha cudurka teetanada?

Astaamaha guud ayaa ku dhaca inta badan 80% dadka uu ku dhaco. Astaanta koobaad waa murqo xanuun daran oo qofku ka dareemaayo murqaha qoorta iyo jaqallada (daanka). Tan waxaa ku xigi kara murqo xanuun daran oo kaa qabanaaya dhabarka, caloosha iyo sinaha. Jajabka waxaa keeni kara jawrarka murqaha oo xanuun badan. Neefta iyo wax liqada ayaa ku adkaan karta qofka. Khalkhalka muruqa codka sameeya ayaa keeni karta dhimasho degdeg ah. Cudurka ayaa sii ahaanaaya mid daran 1 ilaa 4 asbuuc, kadibna si tartiib ah usoo bogsonaaya. 10-25% dadka uu cudurku ku dhaco ayaa ku dhiman kara.

Teetanadu waa cudur aad u xun. Khatarta ayaa ugu badan dadka aad u yar ama waayeelka ka wayn 60. Ilmaha yaryar teetanada ayaa keeni kara waxyeelada maskaxda oo abadiyan ah sabab la xiriirta luminta ogsijiinta. Jajabka dhudhumada iyo araxda ayaa keeni kara naafo abadiyan ah. Dadka qaba teetanada 1 kamid ah 10 kii qof way u dhintaan. Khakhalka daran ee murqaha ayaa carqalad ku noqon karta neefsiga.

Inkastoo teetanadu ay hadda ku yar tahay Ireland sabab la xiriirta barnaamijka talaalka joogtada ah, bakteeniyada keenta cudurka ayaa wali ciida ku jiri karta. Lagama saari karo ciideena. Qaabka keliya ee aad naftaada uga difaacayso teetanada waa inaad talaalka qaadata.

## Yay tahay inuu qaato talaalka teetanada?

Cudurka teetanada waxaa looga hortagaa talaal.

Talaalka teetanada ayaa la siiyaa carruurta ayadoo qayb ka ah 6 talaal oo ku wada jira 1 talaal markay jiraan 2, 4 iyo 6 bilood jir.

Talaalka 6 ku jirta 1 ka talaal ayaa ka hortaga gawracatada, Cagaarshoowga B, Hib (Hargabka Haemophilus b) Jix-dheerta (Xiiqda) Dabaysha iyo Teetanada.

HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

Kuurada talaalka oo xoojin ah ayaa la siiyaa ilmaha markay gaaraan 4-5 sano ([4 talaal ee ku wada jirta 1 talaal](#)) kaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Kuuro kale oo xoojin ah ayaa la siiyaa sanadka 1<sup>aad</sup> ee dugsiiga heerka labaad ([talaalka Tdap](#)) wkaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Haddii adiga ama cunugaagu u baahan yahay talaal, ama aadan hubin xaalada talaalka adiga ama cunugaaga, la xiriir GP gaaga si uu talo uu kuu siiyo.

### Yay tahay inuusan qaadan talaalka teetanada?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka cudurka teetanada. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

### Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka Teetannada?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa baristamool ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inauusan aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

### Sidee talaalka Cudurka teetanadu u shaqeeyaa?

Talaalka ayaa laga sameeyay sunta la suuxiyay ee bakteeriyada teetanada, tan waxaa loo yaqaanaa diyaarinta toxoid. Talaalka ayaa jirka ku haga soo saarista difaaca kahortaga sunta.

Wadarta guud oo shan kuuro ah oo ka kooban talaalka teetanada toxoid oo muddo ku haboon loo dhaxeysiinaayo ayaa la sameeyaa si loo helo difaaca mudada dheer. Kasoo kabashada teetanada ayaan keenayn difaac, talaalka kadib marka teetanadu kugu dhaco ayaa loo baahan yahay.

### Waa sidee waxtarka talaalka teetanadu?

Ku dhawaad 100% carruurta ayaa helaaya difaaca teetanada kadib marka ay qaataan kuurooyinka lagu taliyay ee talaalka.

### Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

## Tetanus

HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo [www.immunisation.ie](http://www.immunisation.ie)